



## Barnaamijka u Diyaar garowga Barbaarinta (Kindergarten-ka) Kaabista Dheeraadka Bilaashka/lacag la'aanta ee Qoysaska ku nool Xaafadaha Dugsiyada Magaalada Columbus

Barnaamijka Bilowga ah (Waterford Upstart) waa barnaamij udiyaar garowga Barbaarinta (kindergarten-ka) guriga kaas oo siinaya ubadkaaga bilow xiiso leh ee ah akhriska, xisaabta, iyo sayniska oo ah 15 daqiiqo oo kaliya maalintii, 5-ta maalmood todobaadkii. Qoysaska aan awoodin inay iska diiwaan-geliyaan fasalka dhexdiisa (in-person classroom), barnaamijkan bilaashka/lacag la'aanta ah, ee la xaqiijiyay wuxuu ka caawinayaa ilmahaaga inuu horumariyo xirfadaha aasaasiga ah ee ay u baahan yihiin inay ugu diyaar garoobaan barbaarinta (kindergarten-ka)!



### Waa Bilaash/lacag la'aan

Barnaamijka Bilowga ah (Waterford Upstart) waa barnaamij online-ka/internet-ka ah oo bilaash/lacag la'aan ah si uu u caawiyo ubadkaaga inuu u diyaar garoobo barbaarinta (kindergarten-ka). Wax kasta oo aad u baahan tahay ayaa lagu daray, xitaa kombuyuutar!



### Way fududahay/sahlan tahay

Ilmahaagu wuxuu casharrada ku dhammeeyaa 15-ban daqiiqo oo kaliya maalintii. Barnaamijku waxa uu xiisahooda ku ilaalinayaa buugaag madadaalo leh, heeso, iyo wax-qabadyo ku habboon heerkooda xirfadeed.



### Taasi way shaqeysaa

Cel-celis ahaan, carruurta adeegsata Barnaamijka Bilowga ah (Waterford Upstart) waxay galaan akhriska barbaarinta oo ku dhow heerka fasalka koowaad!



### Xirfadaha Akhriska

- Aqoonsiga Xarafka
- Codka Xarafka
- Dhawaaqyada Bilawga/Hore
- Fahanka Akhriska iyo Dhageysiga
- Erayada Dhabta Ah
- Erayada Aragg-tida
- Erayada

Wax badan lagama daahin/Ma aha goor hore in la bilaabo u diyaar garowga barbaarinta (kindergarten-ka)!

[ccsoh.us/prek](http://ccsoh.us/prek)

Halkan iska diwaan-geli

**1-888-982-9898**

ama [upstart.waterford.org](http://upstart.waterford.org)



# Barnaamijka Bilowga ah (Waterford Upstart) ayaa la xaqiijiyay inuu wax ku ool yahay, waxaana ogolaaday 97% waalidiinta, wuxuuna caawiyay/ wax taray in ka badan 100,000 goys.

**1 Soo gudbi codsiga**  
Waxay qaadataa in ka yar 10-ban daqiiqo in lagu codsado online-ka. Sawir ka qaad koodka afar-geeska QR-ka ee hoose si aad u bilowdo.

**2 Sameeyso/abuuro akoonka (Waterford Upstart account)**  
Tagg/booqo [upstart.waterford.org](http://upstart.waterford.org) si aad u samaysato akoon oo aad u diwaan-geliso ilmahaaga.

**3 Dhammayso Tababarka Waalidka**  
Tagg/booqo akoonkaaga Waterford Upstart si aad u aragto fiidiyoowga hanuuninta/jihaynta waalidka.

**4 Bilow**  
Waxaan kuugu soo diri doonaa Boostada Xirmada/Xidhmada Soo Dhawaynta iyo kombiyuutarkaaga bilaashka/lacag la'aanta ah (iyo sanduuqa internet-ka (hotspot) haddii loo baahdo) 10-ban maalmood oo ah ayaamaha shaqada gudahooda ah.

**5 Adeegso/Isticmaal barnaamijka**  
Ilmahaagu wuxuu adeegsadaa barnaamijka 15-ban daqiiqo oo keliya maalintii, shanta maalmood todobaadkii. Waxaa kale oo aad taageero qof-ahaaneed/shakhsi ah ka heli doontaa tababaraha barnaamijkaaga.

**6 Qalin-jabinta**  
Inta lagu jiro jiilaalka/kulaylaha, ka dib marka ilmahaagu dhammeeyo barnaamijka, waxaa lagugu marti-qaadi doonaa inaad ka soo qayb-gasho munaasabadda xafladda qalin-jabinta si loogu dabaaldego iyaga (iyo adigaba) shaqadiinii adkayd!

## Wuxuu u shaqeeyaa Dhammaan Carruurta



Bulshooyinka Reer miyiga




Bartayaasha labada luuqadood



Bartayaal aan caadi ahayn

## Isbar-bar-dhigga Heerka Kobaca/horumarka ee Bader



■ Waterford Upstart  
■ Xakamaynta



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xoojinta qof-ahaaneed ee Caruurnimada Hore ee Barnaamijka waxbarashada Dugsiyada Magaalada Columbus, fadlan booqo [ccsoh.us/prek](http://ccsoh.us/prek)

Halkan iska diwaan-geli  
**1-888-982-9898**  
ama [upstart.waterford.org](http://upstart.waterford.org)

